

# Family Care Partnership

(Family Care Partnership)



Family Care Partnership (sidoo kale loo yaqaan Partnership) waa barnaamijka daryeelka muddada dheer ee Medicaid ee loogu tallo galay dadka waayeeleka iyo dadka weyn ee naafada ah. Waxay bixisa daryeel muddada dheer oo **kala duwan, caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka, iyo daawooyinka la qoro.**



**Daryeelka muddada dheer**—adeega ama taageerada laga yaabo inaad u baahto si ay kaaga caawiso howlo maalmeedka, sida labisashada ama qubeyska, sababtoo ah hal ama ka badan ee kuwa xiggo:

- Wuxaan qabtaa naafonimo.
- Wuxaan jirtaa 65 sanno ama ka weyn.
- Wuxaan qabtaa xaalad waarta oo dabada dhereeraata.

**Caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka**—adeegyada dhaqtarka, kaalisada, ama bixiye walboo caafimaadka ee u qalma, oo ay ku jiraan:

- Ka hortaga cudurka
- Dayactirka iyo sare u qaadida caafimaadka
- Waxbarashada bukaanka

**Daawooyinka qoraalka ah**—dhammaan adeegyada daawada Medicaid iyo Medicare: xubnaha iskaashiga uma baahno qorshaha daawada gooni ah oo Medicare Qeybta D

## Yoolka Partnership

Yoolka Partnership ayaa ah inay kaa caawiyaan daboolida baahiyahaaga daryeelka muddada dheer iyo yoolalkaaga shaqsiga.

- Dooro taageerooyinkaaga iyo adeegyada.
- Go'aanso sida aad u isticmaashid maalinkaaga.
- Lahow asturnaan iyo dareen badqab.
- Dareen ixtiraam iyo ula dhaqan cadaalad ah.
- Ku lug yeesho bulshadaada.
- Xiriiro la yeelo qoyska iyo saaxibada.
- Yeelo caafimaadka suurtogalka ah ee ugu fiican.



WISCONSIN DEPARTMENT  
of HEALTH SERVICES

# Sida Partnership u shaqeeyo


Partnership wuxuu ku saabsanyahay inay kuu helaan taagerooinka iyo adeegyada aad ugu baahantahay nolol maalmeedka. Waa kuwaan waxaad filaneysid:

## Koox daryeel ee adiga ku taageero

Iyo Partnership, koox dad ah ayaa kula wada shaqeeyo adiga. Kooxda daryeelkaaga waxaa ka mid ah:

- Dacwoodaha
- Dhaqtar
- Kaaliso dhaqtar
- Maareeye Daryeel
- Kaaliso diiwaangashan
- Xubin qoyska ah ama qaraabo (*iqtiyaar*)
- Xirfadle kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka shaqsiga (*iqtiyaar*)

**Ogow:** Haddii qof ku sameeyo dooqyo sharci ah matalaadaada, waxay kugula lug yeelanayaany adiga Partnership. Waxay hubinayaan in kooxdaada maqasho oo ixtiraamto codkaaga.



## Adeegyada kuu ogolaanayo inaad guriga ku noolaato

Dhibaato malahan halka aad ku nooshahay, kooxda daryeelkaaga ayaa kaa caawin karo inaad heshid taageerada iyo adeegyada aad u baahantahay.

## Fursada kaa caawineyso doorashada adeegyada iyo bixiyayaasha

Waxaad:

1. **Kala hadleysaa kooxdaada daryeelka wax ku saabsan waxa aad rabtid.** Kooxda daryeelkaaga waxay sameynayaan qiimeynya ay kugu bartaan. Waxay fiirinayaan haddii aad jeceshahay halka aad ku nooshahay hadda. Waxay sidoo kale ogaanayaan taageerooyinka aad u baahantahay si aad ugu noolaatid nolosha aad rabtid.
2. **La samee qorshaha daryeelka kooxda daryeelkaaga.** Qorshahaaga daryeelka ayaa kuu dhaqaajinayo yoolalka aad ku qeexday qiimeynya.
3. **Ka dooro bixiyayaal shabakada.** Markii aad iska diiwaangelisid Partnership, waxaad ku biirtay MCO (managed care organization) (ururka daryeelka la maareeyay). Waxay kaala shaqeynayaan inay kuu helaan daryeel muddo dheer iyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee aad u baahato. Adeegyadaan waxaa ka mid noqon karo gaadiid, taageerada daryeelka guriga, cuntooyinka guriga la keeno, iyo wax badan. Waa dooratay adeegyadaada iyo bixiyayaasha, oo ay ku jiraan dhaqtar cusub oo hadda ah, ee shabakada ama dhinaca dooqa adeega shaqsiga hago.
4. **Heleysaa adeegyo iyo taageerooyin.** MCO-gaaga ayaa kaa caawiyo raadinta iyo qorsheynta adeegyada aad dooratay iyo MCO ayaa ku ansixinayo gudaha xirmada faa'idada.



## Ku maalgelinta hal barnaamij

Partnership ayaa bixiyo daryeelka muddada dheer, caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka (oo ay ku jiraan aragga iyo ilkaha), iyo daawooyinka qoraalka oo loo marayo hal barnaamij. Sababtoo ah adeegyadoo dhan waxay ka qeyb yihiin isla barnaamijka, way sahlantahay in la helo daryeel oo aad isticmaashid faa'idooyinkaaga.



## Meesha laga barto wax badan oo ku saabsan Partnership

Si aad wax badan u baratid, fadlan booqo websaydka [Wisconsin Department of Health Services \(Waaxda Adeegyada Caafimaadka Wisconsin\) \(DHS\)](https://dhs.wisconsin.gov/familycare/fcp-index.htm) (dhs.wisconsin.gov/familycare/fcp-index.htm) ama sawir koodhka QR.



Si aad u ogaatid haddii aad u qalantid xiriir:

- [ADRC deegaankaaga \(aging and disability resource center\) \(xarunta illaha gabowga iyo naafonimada\)](https://dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/index.htm).
- [Tribal ADRS kaaga \(aging and disability resource specialist\) \(taqasuska illaha gabowga iyo naafonimada\)](https://dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm) (dhs.wisconsin.gov/adrc/consumer/tribes.htm).
- DHSFCWebmail@dhs.wisconsin.gov.
- Adeegyada Xubinta Medicaid ee 800-362-3002.

## Qoraalada:

---

---

---

---

---



WISCONSIN DEPARTMENT  
of HEALTH SERVICES